# Waxaad rabtaa inaad magangelyo weydiisato

Is dhiibitaan iyo mudada nasashada iyo is diyaarinta

**Maxaa laguu siinayaa qoraalkan?**
Waxaad u timid Nederlaan si aad badbaado (magangelyo) u weydiisato. Magangelyo waa: badbaado waddan kale ay siiso dadka aan wadankooda badbaado ku qabin. Iyo aan wadankooda badbaado ka heli karin. Marka aad magangelyo weydiisato, waxyaalo badan ayaa kula soo dersaaya. Qoraalkan waxaad ka aqrin kartaa waxa aad kala kulmi doonto mudada beryaha koowaad ee dacwada magangelyada. Tani waxey IND ku magacowdaa marxalada isdhiibitaanka.

# Ururadee ayaa la kulmeysaa mudada marxalada isdhiibitaanka?

Mudada marxalada isdhiibitaanka waxaad la kulmeysaa iyo la hadleysaa dad ka socdo ururo kala duwan. Ururada qaarkood waxey ka tirsan yihiin dowlada Nederlaanka kuwana kama tirsana. Halkan hoose ayaa ka arkeysaa ururada kala duwan astaamahooda. Waxaa kaloo ku qoran faahfaahin yar waxa ay qabsadaan.

Waxaad ka yar tahay 18 jir iyo waalid la'aan ama dad kale oo si rasmi ah kuu daryeela kulama socdaan Nederlaan. Haddana waa inuu sharciga Nederlaan inuu qof si rasmi ah kuu daryeelaa. Taasi waxaa loo yaqaanaa mas'uulka. Waxaa Nederlaan howshaasi ku howlan **Stichting Nidos** Ururka Nidos. Nidos ayaa dalbaneysa mas'uuliyadaada. Ururka Nidos ayaa qof ka mid ah shaqaalahooda ka dhigaaya daryeelaha dhalinta ee adiga kuu qaabilsan. Qofkaasi wuxuu ku caawinaayaa mudada dacwada magangelyada. Daryeelaha dhalinta ayaa kaa cawinaaya sida go'aanada muhiimka ah. Iyo ka shaqeynaaya inaad hesho meel fiican oo aad degto iyo kuu helaaya iskuul aad aado. Nidos wax awood ah kuma laha go'aanka codsigaaga magangelyo.www.nidos.nl

**Qeybta Boliiska Ajaanibta, Aqoonsiga iyo Ka ganacsiga Dadka** (AVIM) waa qeyb ka tirsan boliiska Wadanka iyo waxey ilaaliyaan ajaanibta jooga Nederlaan. Shaqaalaha ayaa sugaaya qofka aad tahay iyo ka diiwaangelinayaan nidaamka warbixintaada iyo dokumentiyada ayey kaa qaadayaan si loo soo baaro.

**Ciidanka Ilaalada** (KMar) waxey ilaaiyaan xaduudka Nederlaan. Iyo waxey kaloo baaraan dokumentiyada (tusaale baasaboorada)iney sax yihiin. Shaqaalaha waxey kaloo ku diiwaangelin karaan warbixintaada nidaamka.

Waxa **Xarunta Dhexe ee Dejinta Magangelyodoonka** (COA) ayaa dejinta iyo hagista u qaabilsan mudada dacwada maganglyodoonka ee magangelyodoonada Nederlaan. Waxaa kaloo ay COA u qaabilsan tahay inaad hesho cunto iyo ceymiska daryeelka caafimaadka. COA ayaa kaa caawin karta la xariirka dhaqtarka. COA waa urur madaxbanaan mana go'aamiyaan codsigaaga magangelyada.
www.coa.nl

**Immigratie- en Naturalisatiedienst** (IND)Waa qeyb ka tirsan Wasaarada Cadaalada iyo Amaanka ee Nederlaan. IND waxey baaraan haddii aad xaq u leedahay magangelyo Nederlaan inaad ka hesho. Sidaa awgeed ayaa wadahadalada ula leedahay shaqaalaha ku saabsan qofka aad tahay. Iyo sababta aad Nederlaan magangelyo uga weydiisatay. Waxaa IND baarayaan xaaladaada shaqsiga iyo xaalada wadanka aad ka timid. Ka dib ayaa IND go'aamineysaa inaad (muddo) Nederlaan joogi karto iyo kale.
www.ind.nl

**VluchtelingenWerk Nederland** (VWN) waa urur bani'aadannimada oo madaxbanaan oo loo sameeyey si aya danaha magangelyodoonka u ilaaliyaan. VWN warbixin iyo taageero shaqsi ahaan ah ayey ku siinayaan marka aad mareyso dacwada magangelyada iyo wey kaa dhex dhexadinayaan marka aad dhibaato kala kulanto ururo kale. Iyo waxey si aad ah ula shaqeeyaan garyaqaankaaga. VWN kama go'aaminayaan codsigaaga magangelyada.
www.vluchtelingenwerk.nl
www.refugeehelp.nl

Dhismayaasha IND iyo xeryaha COA waxaa socdashaqaalaha **sikuuritaga** ayaa jooga. Waxaad ku aqoonsaneysaa labiskooda gaarka. Waxey u joogaan amaankaaga. Waxey keydka dhigaan boorsooyinkaaga. Iyagana su'aalo ayaad weydiin kartaa ku saabsan waxa la oggol yahay iyo waxa aan la oggolayn xarumaha. Shaqaalahan sikuuritaga wax awood ah kuma laha go'aanka codsigaaga magangelyo. Mana heystaan awood ay ku daaqulaan arrintaada shaqsiga.

**Daryeelka Caafimaadka Magangelyodoonka** (GZA) waa ururka aad aadeyso haddii aad jiran tahay ama su'aalo caafimaad aad qabto. Waxaa xerada COA dhexdeeda ama agagaarkeeda ku yaala xarunta caafimaadka GZA. GZA ayaa sameyneysa ballamada kalkaalisada dhaqtarka, kalkaalisada, caawiyaha dhaqtarka GGZ ama dhaqtarka qoyska.
www.gzasielzoekers.nl

Waxaad xerada dejinta ballan la leedahay kalkaalisada **Argonaut Advies** (hore loo yaqaanay Medifirst). Kalkaalisadan waxey ku weydineysaa haddii aad la shaqeyneyso baaritaanka caafimaadka. Baaritaankan waxaa loogu talo galay in la sugo haddii aad dhibaatooyin maskax ahaan iyo/ ama jir ahaan leedahay kuwaasoo saameyn ku yeelan kara wadahadalada IND.

## Maxaa dhacaaya marxalada is dhiibida?

Waxaad kaloo hoos aqrineysaa sidey wax u dhici doonaan marxalada isdhiibitaanka. Waxaa suura gal ah in tallaabooyinka xaaladaada ay si kale isugu xigaan. Waxaad marka hore iska xaadirineysaa Ter Apel. Tallaabooyinka intooda kale meel kale ayaa ay ka sii socon karaan.

| | |
|---|---|
| Tallaabada 1 | Imaanshaha AC Ter Apel |
| Tallaabada 2 | Is qoritaanka koowaad ee IND |
| Tallaabada 3 | Aadista xerada dejinta |
| Tallaabada 4 | Aqoonsiga iyo diiwaangelinta |

| | |
|---|---|
| Tallaabada 5 | Baaritaan caafimaad |
| Tallaabada 6 | Wadahadalka NIDOS |
| Tallaabada 7 | Wareysiga is dhiibitaanka |

**Tallaabada 1: imaanshaha Xerada Isdhiibitaanka Ter Apel**
Waxaad aadeysaa xerada is dhiibitaanka ee Ter Apel. Dhismahan waa meesha dhamaan dacwadaha magangelyada ay ka bilowdaan. Imaanshahaaga ka dib:

- sikuuritiga ayaa magacaaga qoraaya iyo sikuuritiga ayaa boorsadaada meel dhigaaya.
  wuxuuna sikuuritiga ku geynaayaa qolka sugitaanka. Halkan ayaa ku sugeysaa ilaa uu shaqaalaha- IND uu kaaga yeero baaliga si laguu wareysto.

**Tallaabada 2: diiwaangelinta koowaad ee IND**

- Waxaa IND ku weydiineysaa warbixintaada shaqsiga iyo waxaa lagaa qaadaayaa sawir. Iyo waxey ku keydinayaan nidaamka kambiyuutarka.
  Markaa iND waxey ku weydiin karaan inaad foom su'aalo ku buuxisaa warqad ama kambiyuutarka. Foomkan waxaa loo yaqaan foomka isqorida. IND ayaa xadideyso haddii aan foomka isqorida lagu shaqeyneynin, tusaale maadaama ay mashquul yihiin. Foomkan ayaa IND ka sii heleysaa horaantii warbixintaada muhiimka ah. Tusaale ahaan waxaa ku qoran su'aalo meesha aad deganayd, reerkaaga iyo safarkaaga. Waxaa kaloo ka jawaabeysaa iyadoo kooban sababta aad wadankaaga uga soo baxday oo aad magangelyo u weydiisaneyso Nederlaan. Waxaa IND isticmaaleysaa warbixintan si ay u xadidaan sida uu dacwadaada magangelyada u soconaayo. Sidaa awgeed waa muhiim inaad jawaab daacad ah siisaa.

**Tallabada 3: aadista xerada dejinta**
Marka lagu diiwaangeliyo waxaad aadeysaa xerada. COA ayaa ku tusineysa meesha aad seexaneyso iyo wax ku cuneyso. Iyagaa ku hagaaya ballamadaada mudada soo socda.

Wadahadalka ka dib ayaa NIDOS weydiisanayaan mas'uuliyadaada.

**Tallaabada 3: aqoonsiga iyo diiwaangelinta**
Codsigaaga magangelyo awgeed waa in dowlada Nederlaan ogaatаa qofka aad tahay. Sidaa awgeed ayaa marka hore la sameeyaa aqoonsiga iyo diiwaangelinta:

- Aqoonsiga waa sugida qofka aad tahay. Taasi waxaa loo sameynayaa dokumentiyada iyo iyadoo su'aalo lagaa weydiiyo asalkaaga.
- diiwaangelinta waa warbixinta oo lagu keydiyo nidaam wadanka ah. Warbixintan waxey muhiim u yihiin ka shaqeynta codsigaaga magangelyo.

Waxaa jiro 2 urur oo ku howlan aqoonsiga iyo diiwaangelinta. Kuwaasi waa AVIM iyo KMar. Diiwaangelinta waxaa lagu sameeyaa iyadoo tarjumaan jiro (taleeoonka ah). Hoos ayaa ka aqrineysaa sida uu diiwaangelinta u socdo.

Shaqaalaha AVIM ama KMar:

- ku weydiinayaan magacaaga, meesha aad deganayd iyo safarkaaga. Shaqaalaha wuxuu taasi u sameynayaa si uu shaqsiyadaada u xadido. Sidaa awgeed waa muhiim inaad jawaab daacad ah siisaa.
- saxiixa ayaa ku qor lagu leeyahay codsiga magangelyada. Taasi waxaa keliya lagu weydiinayaa haddii aad 12 jir ama ka weyn tahay. Dokumentigan waa cadeyn rasmi ah inaad Nederlaan magangelyo ka weydiisatay.
- waxey kaa sameynayaan sawir wajigaaga ah, waxey kaa qaadayaan faraha astaantooda iyo waxey ku weydiinayaan saxiixa. Taasi waxaa kaloo loogu baahan yahay si loo sameeyo dokumentiga: Cadeynta Aqoonsiga Ajaanibta (VI). Dokumentigan ayaad ku tusi kartaa inaad magangelyo ka weydiisatay Nederlaan.
- waxey kaa qaadayaan dokumentigaaga, tusaale baasaboorkaaga. Iyo waxey dokumentigaaga shaqsiga u dirayaan baaritaan. Haddii ay kuwo sax ah yihiin dhamaadka dacwada magangelyada ayaa laguu soo celinayaa.
- wey kaa qaadayaan taleefoonkaaga si ay u baaraan. Waxaa la baarayaa in warbixin taleefoonkaaga ku jiro oo muhiim u noqon kara codsigaaga magangelyada. Baaritaanka ka dib taleefoonkaaga waa laguu soo celinayaa. Taasi dhowr beri ayey qaadan kartaa.
- baarayaan alaabtaada.
- waxey ku weydiinayaan inta da'daada tahay haddii aadan dokumenti soo qaadanin cadeynaaya qofka aad tahay. Shaqaalaha wuxuu ku weydiinayaa su'aalo adiga kugu saabsan iyo da'daada iyo waxey si fiican u fiirinaayaan qaabka aad u eg tahay. Taasi waxa lagu magacaabaa fiirinta da'da. IND iyadana wey sameeyaan, tusaale mudada wareysiga koowaad: wareysiga isdhiibitaanka. Wixii dheeraad ah ka aqri tallaabada 7. Waa inaad la shaqeysaa marka da'daada la fiirinaayo. Makuu arkayaan AVIM/KMar iyo IND inaad si waadix ah da'yar tahay? MArkaa waxaa laguu tixgelinayaa da'dii aad sheegatay. Makuu arkayaan AVIM/KMar iyo IND inaad si waadix ah da'weyn tahay? Ama lama shaqeyneysid marka fiirinta da'da? Markaa da'daada waala bedelayaa nidaamka oo waxaa laguu arkayaa da'weyn. Da'daada waxaa loo bedelaayaa 18 jir.
- Da'daada weli waadix ma aha? Markaa IND waxey bilaabi karaan baaritaanka da'da. Waxa uu yahay waxaad ka aqrineysaa bogga 7.

**Tallaabada 5: baaritaan caafimaad**

Diiwaangelinta ka dib waxaa wadahadal caafimaad la yeelaneysaa GZA. Waxaa kaloo Adeega Caafimaadka GGD ay baarayaan xaaladaha qaarkood haddii aad qaaxo (tiibiiga) leedahay. Tani waa xanuun infekshan ah oo leys qaadsiiyo. Markaa waxey ka sambabahaaga ka sameynayaan sawir raajo ah.

**Tallaabada 6: Wadahadalka NIDOS**

Diiwaangelinta ka dib waxaa wadahadal la yeelaneysaa Nidos. Mar mar ayaa wadahadalkan mar dambe mareysaa. Wadahadalka NIDOS wuxuu ku saabsan yahay mawduucyada soo socda:

- qofka aad tahay iyo xaaladaada sidey tahay;
- sababta aad u soo qaxday iyo haddii aad famil ku leedahay Nederlaan;
- warbixinta dacwada magangelyodoonka;
- warbixinta masuul ka noqosho.

Wadahadalka ka dib ayaa NIDOS weydiisanayaan mas'uuliyadaada.

**Tallaabada 7: wadahadlka IND: wareysiga isdhiibitaanka**
Tani waa wadahadal muhiim ah oo IND su'aalo ku weydiinayaan. Hore miyaa foomka isdhiibitaanka u buuxisay? Markaa IND waxey isticmaaleysaa warbixintaasi mudada wadhadalka. Mar mar waxaa jooga qof ka socda Nidos.

Hadafyada ugu muhiimsan ee wareysiga isdhiibitaanka waa:

- warbixin in laga helo:
  - qofka aad tahay;
  - meesha aad ka timid;
  - sida aad u soo safartay.
- in la fiiriyo dokumentiyadee ayaa dhiibatay. Ma heysataa dokumenti aadan hore u dhiibanin? Markaa kuwaasi IND waad siin kartaa.
- baaritaan haddii wadan kale oo Yurub ah loo baahan yahay inuu ka go'aamiyo codsigaaga magangelyo. Wixii warbixin dheeraad arrintan waxey ku qoran yihiin qoraalka ÎChildren asking for international protection”.
- go'aaminayaan sida uu dacwadaada magangelyo u soconaayo.

Waxaa IND ku weydiinayaan su'aalo ku saabsan:

- shaqsiyadaada, jinsiyadaada,asalkaaga, degaankaaga iyo agagaarka degaankaaga;
- reerkaaga iyo daryeelahaaga;
- dokumentiyada;
- waxbarashada;
- shaqada iyo waajibka milatariga;
- deganaan wadamo kale;
- safarkaaga ilaa Nederlaan;
- da'daada. Waxaa kaloo haqaalaha uu fiirinaaya sida aad eg tahay (fiirinta da'da);
- sababta aad magangelyada u weydiisaneyso.

Waa muhiim inaad wadahadalkaan inta ugu badan ee suura gal ah ka sheegtaa familkaaga iyo daryeelayaashaada. Iyo meesha ay degan yihiin iyo meesha aad adiga deganayd. Mudada wadahadalkan keliya wax yar ayaa jawaab ka bixineysaa sababta aad magangelyada u weydiisaneyso. Waxaa IND u isticmaleysaa warbixintan si loo xadido sida uu dacwadaada magangelyada loo qorsheyn doono. Wareysi labaad ayaad si faahfaahsan ugu sheeganeysaa sababaha aad magangelyada u weydiisaneyso. Wadahadalkan waxaa la yiraahdaa wareysiga dambe.

Waxaa IND ka sameyneysaa wadhadalka (qoraal). Mar dambe ayaa koobi lagaa siinayaa.

Ma dhamaaday wareysiga isdhiibitaanka? Waxaa IND ay kaa qaadi karaan codkaaga oo la duubo si loo fiiriyo meesha aad ka timid. Waxaa markaasi ku hadleysaa muddo gaaban oo xariira luqada ama luqadaha ee caadada kuu ah inaad ku hadasho.

**Tarjumaan**
Waxaad leedahay wadahadalo kala duwan oo ururo kala duwan la leedahay. Wadahadalada badankooda waxaa ku caawinaaya tarjuman si wadahadalka loo tarjumo. Tarjumaanka ayaa jumladaha iyo ereyada Nederlaanka ku tarjumaaya luqada adiga aad fahmeyso. Tarjumaanka ayaa waxaad sheegto u tarjumaaya luqada Nederlaanka. Tarjumaanka wax awood ah kuma laha go'aanka codsigaaga magangelyo. Mar mar ayaa tarjumaanka meesha shaqsi ahaan u joogaa wadahadalka. Laakiin badiyaa taleefoon ahaan ayuu u dhacaa. Marka wadahadalka IND ee sababaha aad magangelyada u weydiisaneyso mar walba tarjumaan ayaa shaqsi ahaan u joogo. Isla markii sheeg haddii aad adiga iyo tarjumaanka aad si fiican

## Baaritaanka da'da

- Waxaa IND go'aamin kartaa baaritaan da'da in la sameeyo si da'daada loo cadeeyo. Taasi waxey dhacdaa xaaladaha soo socda dhamaan ku quseeyaan: ma heysatid dokumenti ku saabsan da'daada.
- Adiga wadan- EU ka tirsan lagaama yaqaan magangelyodoon ahaan. Boliiska taasi wuxuu ka baarayaa nidaam astaanta farahaaga.
- Boliiska iyo IND ayaa ka shakinaaya da'daada ka dib markii da'daada la fiiriyey;

Dhaqtar ayaa wadahadal kula yeeshay ama sameeyey fiirinta da'daada.

**Baaritaanka**
Baaritaanka waxaa lagu sameynayaa xarun gaar ah. Baaraha ayaa sameynaaya sawiro raajo ah oo garabkaaga iyo gacantaada. Waxaa sawirka raajada lagu sameynaayaa qalab gaar ah oo maqaarka dhexdmara oo lafahaaga fiirin kara. Wax xanuun ah ma laha waa isla dareenka sawirka caadiga marka la sameynaayo. Dhibna uma laha caafimaadkaaga. Lafta garabka iyo lafta gacanta-/cududa gacanta ee ilmaha wey ka duwan yihiin kan dadka waaweyn. Baaraha ayaa sidaa awgeed sawirada raajada garabka iyo gacanta ka sameyn karaa gunaanad waxa da'daada yahay.





**Baaritaanka ka dib**
Ma ka soo baxay baaritaanka da'da inaad sheegin taariikhda dhalashada saxda ah? Markaa IND wey ka shakin doonaan dhamaan wixii kale ee aad sheegtay iney run yihiin. Sida sababta aad uga soo baxday wadankaaga.
Ma ka soo baxay baaritaanka da'da inaad ugu yaraan 18 jir tahay? Markaa IND waxey codsigaaga magangelyada u sii fiirinayaan sida codsiga magangelyada ee dadka weyn magangelyodoonka ah. Da'daada waxaa loo bedelaayaa 18 jir.

Ma rabtid in baaritaan da'da ah laguu sameeyo? Markaa taasi waxey IND u tahay calaamad inaad da'da dhalashada saxda ah aadan sheegin.

Markaa IND da'daada waxey u bedeleysaa 18 jir markaa da'weyn ayaa laguu arkayaa. Markaa IND wey ka shakin doonaan dhamaan wixii kale ee aad sheegtay iney run yihiin. Sida sababta aad uga soo baxday wadankaaga.

## Maxaa dhacaaya marxalada is dhiibida?

Marxalada is dhiibida ka dib:

- waxaad aadeysaa xero dejinta. Ma ka yar tahay da'daada 15 jir iyo 18 jir? Markaa waxaa aadeysaa marxalada isdhiibitaanka ka dib xero gaar ah. Xeradan waa tii COA oo waxaa si gaar loogu sameeyey daẏarka magangelyodoonka ah. Ma ka yar tahay da'daada 15 jir? Markaa Nidos ayaa dejin kuu abaabuleysa. Waxaa muddo la degan tahay dad gurigooda oo ah cid ilmaha heysa.
- waxaa IND xadideysaa sida uu dacwadaada magangelyo u socon doono;
- oo IND ayaa xadidi karo inta baaritaan loo baahan yahay si ay uga go'aamiyaan codsigaaga magangelyada. IND waxey sameyn karaan baaritaan, tusaale dokumentigaaga;
- waxaa bilaabanaaya mudada nasashada iyo is diyaarinta (RVT). Waxaad kaloo hoos aqrineysaa sidey wax u dhici doonaan mudada RVT.

## Maxaa dhacaaya mudada RVT?

Waxaa koleyba RVT uu soconayaa 3 wiig. Haddii uu mashquul badan jiro ka badan. Mudadani waxaa ka nasaneysaa safarkaaga Nederlaan. Waxaa markaasi sugeysaa wadahadaka ugu muhiimsan ee IND, wareysiga dambe. Wareysigan waxaad si faahfaahsan u sheeganeysaa sababaha aad magangelyada u weydiisaneyso. Warbixin dheeraad ku saabsan ka aqri qoraalka: ""Haddii aad magangelyo weydiisaneyso: Warbixinta Guud ee dacwada magangelyodoonka". Waxaa lagu siinayaa qoraalkan mar dambe. Waxaad kaloo hoos aqrineysaa sidey wax u dhici doonaan mudada RVT. Tallaabooyinka si kale ayey isugu xigi karaan.

| | |
|---|---|
| Tallaabada 1 | Warbixinta |
| Tallaabada 2 | Garyaqaanka |
| Tallaabada 3 | Wadahadal kalkaaliye caafimaad |
| Tallaabada 4 | Dokumentiyada ka dib loo diraayo IND |
| Tallaabada 5 | Casumaada wareysiga dambe |

**Tallaabada 1: warbixinta**
Waxaa warbixinka heleysaa VWN oo dacwada magangelyodoonka ku saabsan. Iyo ururada aad la kulmeyso mudada dacwada kuu socoto.

**Tallaabada 2: garyaqaanka**
Waxaad heleysaa garyaqaan kaa caawiya isu diyaarinta Dacwada Guud ee Magangelyada. Garyaqaankaaga wuxuu yaqaanaa sharciyada iyo nidaamka magangelyada. Iyo ogoow muhiimada wareysiga dambe leeyahay. Looma baahna inaad garyaqaanka adiga iska bixiso.

**Tallaabada 3: Wadahadal kalkaaliye caafimaad**
Waxaad xerada dejinta ballan la leedahay kalkaalisada. Mudada wadahadalkan waxaa kalkaalisada ku weydiin haddii aad leedahay dhibaato maskax iyo/ama jir ahaan ah. Kalkaalisada waxey rabtaa iney ogaato in dhibaatooyinkaasi saameyn ku leeyihiin wadahadalka IND aad la leedahay. Qaabkan ayaa IND ilaa intii suura gal ah ku xisaabtami karaan.

**Tallaabada 4: Dokumentiyada ka dib loo diraayo IND**
Ma heysataa dokumentiyo muhiim ah oo arrintaada aad magangelyada u weydiisaneyso cadeynaaya? Ama dokumentiyo da'daada cadeyn kara? Markaa dokumentiyadan halaguugu soo diro Nederlaan. Isku day inaad sida ugu dhaqsaha badan u abaabusho. Waxaa IND suura gal ah iney soo baarayaan iney dokumentiga sax yihiin.

**Tallaabada 5: casumaada wareysiga dambe**
Waxaad heleysaa warqada casumaada IND ee wareysiga dambe. Qoraalka: ""Haddii aad magangelyo weydiisaneyso: Warbixinta Dacwada Guud ee Magangelyodoonka", ayaa ka aqrineysaa sida dacwada u sosconeyso.

## Keydinta xogta gaarka ah

Xogta gaarka ah waa dhamaan warbixin adiga kugu saabsan. Ururada la shaqeeyey qoritaanka qoraalkan hoos ayey ku qoran yihiin. Ururadaan wey isticmaalaan xogta shaqsiga mudada codsigaaga laga shaqeynaayo, soo gudbinta ama codsiga. Waxey ku weydiinayaan warbixintaada iyo ururada kale ama dadka kale hadii loo baahdo. Ururadaan waxey isticmaalaan iyo keydiyaan warbixintaada iyo waxey u sii gudbiyaan ururo kale haddii taasi sharci ahaan qasab tahay. Sharciga xogta shaqsiga waxaa ku qoran waajibaad saaran ururada warbixinta isticmaala. Waa iney si sax ah iyo amaan ah warbixintaada u isticmaalaan. Sharciga xogta shaqsiga waxaa kaloo ku qoran xaquuqdaada. Haddii aad weydiisato, waxaad leedahay tusaale ahaan xaquuqda soo socda:

- inaad aragto warbixintaada ururada haaya;
- ogaato waxa ay ururada ku sameynayaan warbixintaada iyo sababta;
- ogaato ururadee warbixintaada loo gudbiyey.

Ma rabtaa inaad wax dheeraad ka ogaato isticmaalka xogtaada shaqsiga iyo xaquuqdaada? Markaa fiiri websaaytyada ururadaasi.

Qoraalka waxaa si wadajir ah u soo saaray:
Qeybta Boliiska Ajaanibta, Aqoonsiga iyo Ka ganacsiga Dadka (AVIM)
Nidos
Xarunta Dejinta magangelyodoonka
Centraal Orgaan opvang asielzoekers (COA)
Adeega-Imigrashanka iyo Jinsiyada (IND)
Ciidanka Ilaaliya xaduudka (Kmar)
Guddiga taageerida Sharciyada (RvR)
Urur qaxootiga Caawiya Nederlaan (VWN)
Ururka Caalamiga ee Muhaajiriinta (IOM)
Waaxda Dib u Noqoshada iyo Bixitaanka (DT&V)

Oo ay soo dalbeen:
Wasaaradda Cadaalada iyo Amaanka, maamulaha maamulka Imigrashanka
www.rijksoverheid.nl

Qoraalkan waxa ku qoran wax xaquuq ah kama soo saari kartid. Haddii tarjumaada ay dhaliso fahmid qalad ah, markaa mida Nederlaanka ayaa la raacayaa.